

Waqti kasta isku-qor oo wax badan ka keydso Cascade Care Savings

Muddo is-qoritaan gaar ah ayaa loo heli karaa shakhsiyaadka iyo qoysaska xaqa u leh oo ah ilaa 250% ee heerka saboolnimada federaalka (FPL) kuwaas oo aanan helin Kaydka Cascade Care Savings.

Loogu talagalay qoysaska ilaa 250% FPL

(Isticmaal shaxda hoose si aad u aragto haddii aad xaqa u leedahay)



Xitaa wax badan ka dhaqaaleyso Cascade Care Savings, oo ah kaalmo dowladeed oo hoos u dhigaysa kharashaadkaaga ee bil kasta ah

Adeegyo badan oo caymisan oo leh kharashaad yar oo uu qofku jeebkiisa ka bixinayo



Keliya laga heli karo *Washington Healthplanfinder*

Waa maxay Cascade Care Savings?

Cascade Care Savings waa kaalmo dowladeed oo kaa caawin karta yareynta kharashkaaga bilaha ah ee caymiska caafimaadka. Kuwa xaqa u leh, waxay awoodaan in ay isku qoraan qorshe caafimaad sannadka oo dhan. Si aad xaqa ugu yeelato keydadkaasi, waa in aad xulataa qorshaha Cascade Care Silver ama Gold.

Qorsheyaasha Cascade Care ayaa waxaa bixiya dhammaan shirkadaha caymiska ee ka hawlgalla dhammaan degmooyinka Washington.

Dakhligaaga miyuu xaqa kuu siinayaa kaydka Cascade Care Savings?

Shaxda dhanka midig ee ku taalla waxay bixineysaa qaddarka ugu badan ee uu qoysku kasban karo si aad xaqa ugu yeelato kaalmada Cascade Care Savings.

Shakhsiyaadka qoyska/reerka ka tirsan	Dakhliga bil kasta	Dakhliga sannad kasta
1	\$3,038	\$36,450
2	\$4,108	\$49,300
3	\$5,179	\$62,150
4	\$6,250	\$75,000
5	\$7,321	\$87,850
6	\$8,392	\$100,700
7	\$9,463	\$113,550
8	\$10,533	\$126,400

*Qoysaska/reerarka ka kooban in ka badan sideed qof, kuddar \$12,850 qof kasta/sannadkii. (Shaxdani waxaa loo adeegsan karaa qorshaha sannadka 2024 waxaanna la cusboonaysiinayaa sannad kasta.)